



CADAALADA GURIYEYNTA

Fursad Simman oo Dadkoo dhan ah



**WAAXDA GURIYEYNTA MAREYKANKA IYO HORMARINTA
MAGAALOYINKA**

Xafiiska Cadaalada Guriyeynta Iyo Fursadaha Simman



Fadlan booqo websaydkeena: www.hud.gov/fairhousing



CADAALADA GURIYEYNTA – FURSAD SIMMAN OO DADKOO DHAN AH

Ameerika, oo wado walbo ah, waxay matashaa sinnaanta fursada dadka oo dhan. Kala duwanaanshaha muwaadaniinta iyo ruuxa midnimada ee nagu hogaamiyo dhammaanteen mabaadi'da xurnimada iyo cadaalada xilliga la aasaasay wadankaan. Taasi waa sababta ay si adag carqalad ugu tahay goortii muhaajiriin cusub, dadka laga tira badanyahay, qoysaska carruurta wadata, iyo dadka curyaanka loo diido guriga dooqooda ah sababtoo ha takoorka sharci darada ah.

Waaxda Guriyeynta iyo Hormarinta Magaalada (HUD) waxay fullisaa Xeerka Cadaalada Guriyeynta, taas oo mamnuucdo takoorka iyo ku cabsi gelinta dadka dhismooyinka guryahooda dabaqa, iyo hormarinta guryaha iskaashatada – Ku dhawaadkii wareejinta guriyeynta oo dhan, oo ay ku jiraan kirada iibsiga guriyeynta iyo bixinta deynta guriga.

Helitaan simman ee kirada guriyeynta iyo fursadaha lahaanshaha guri waa asalka xeerka guriyeynta federaalka wadankaan. Bixiyayaasha guriyeynta ee diido in ay ka kireeyaan ama ka iibiyaan guryaha dadka sabab ku saleysan qomiyada, midibka, asalka dhalashada, diinta, nin/naag, heerka qoyska, ama curyaannimada waa xadgududka sharciga federaalka, iyo HUD waxay si aad ah u dabagalayaan fullinta ficilada ka soo horjeedo iyaga.

guryaha ma ahan kaliya sharci daro, waxay ka soo horjeedaa wado walbo ee mabaadi'da xoriyada iyo fursada aan qiimeyno sida Ameerikaanka. HUD waxaa ka go'an in ay hubiso in qof walba loola dhaqmo si simman marka la raadinayo meel la yiraahdo guri.

TUSMADA

Xeerka Cadaalada Guriyeynta	1
Guryahee Daboolan?.....	1
Waa maxay mamnuucida?.....	1
Ilaalada Dheeraadka Haddii aad Qabtid Curyaannimo.....	3
Ilaalada Guryaha ee Qoysaska Carruurta wata.....	4
Haddii Aad u Maleysay Xaquuqdaada In lagu Xadgudbay.....	6
Maxaa dhaco Goorta aad Gudbiso Cabasho?.....	9
Maxaa Dhaca Haddii Aan Waayo Gurigeyga ee	
Dhinaca Ka saarida ama libinta?.....	11
Maxaa Dhaco Markii Cabashada La baaro?.....	11
Intaa waxaa Dheer.....	13



XEERKA CADAALADA GURIYEYNTA

Xeerka Cadaalada Guriyeynta wuxuu mamnuucayaa takoorka guriga sababtoo ah:

- Qomiyada ama middibka
- Asalka Dhalashada
- Diinta
- Nin/Naag:
- Heerka qoyska (oo ay ku jiraan carruurta ka hooseyso da'da 18 sanno ee la nool waaladiinta ama hayaha u sharciyeysan; naag uur ah iyo dadka waxay hubinayaan haynta carruurta ka hooseysa 18)
- Curyaanimada

GURYAHEE DABOOLAN?

Xeerka Cadaalada Guriyeynta waxay dabooshaa guryaha inta badan. Xaaladaha qaarkood, Xeerka wuxuu ka reebayaa dhismaha milkiilaha la daganyahay iyo ma ahan wax ka badan afar qeyb, guriyeyn halka qoys ah la iibiyay ama la kireeyay iyada oo aan jirin isticmaalka dallaal iyo guryaha ay maamulaan hay'adaha iyo kooxyada gaarka ah ee xadeeyo deganaanshaha xubnaha.

WAA MAXAY MAMNUUCIDA?

Iibka ama Kirada Guryaha: Ma jiro qof qaadi karo mid ka mid ah tallaabooyinka xigga ee ku saleysan qomiyadda, middibka, diinta, nin/naag, curyaanimada, heerka qoyska, ama asalka dhalashada:

- Diido in la kireeyo ama la iibiyo guriga
- Diido in uu kala xaajoodo guriga
- Ka dhigida guriga kuwa aan lahehi karin
- Haddii kale diido guriga
- Hagaajiyo muddo kala duwan, sharuudo, ama mudnaanta iibsiga ama kireynta guriga
- Bixiyo adeegyo guriyeyn kala duwan ama xarumo
- Si been ah u diido in gurigaas diyaarka u ah baaritaanka, iibinta ama kirada

- Faa'idada, ka dhaadhicinta, ama isku day in aad ka dhaadhicisid milkiilaha guriga in uu iibiyo ama kireeyo guryaha iyaga oo soo jeedinayo in dadka qomiyada gaarka ah, iwm. U guuraan, ama ay ku dhowyihiin in ay usoo guuraan xaafada (ku qalqaalinta) ama
- Diidmada gelida qof walba ee, xubinnimada ama ka qeybqaadashada, hay'ad walba, xarunta ama adeega (sida qoraalka adeegyo badan) ee la xiriiro iibinta ama kireynta guryaha, ama ku takooro qof walba muddooyinka ama sharuudaha helida noocaas ah, xubinnimada ama ka qeybqaadashada.

Deeminta Deynta guriga: Ma jiro qof qaadi karo mid ka mid ah tallaabooyinka xigga ee ku saleysan qomiyadda, middibka, diinta, nin/naag, curyaannimada, heerka qoyska, ama asalka dhalashada:

- Diido in uu sameeyo deyminta deynta guriga
- Diido in uu sheego warbixinta la xiriirto deymaha
- Ku soo rogo muddooyin kala duwan ama sharuudo deynta, sida danaha kala duwan, qodobada, ama qidmooyinka
- Takoorka qiimeynta guriga
- Diido in uu iibiyo deynta ama
- Sameeya muddooyin ama sharuudo ka duwan iibsiga deynta.
- Intaa waxaa dheer, waa xadgudubka Xeerka Guriyeynta Cadaalada in:
- Loo hanjabo, la qasbo, la cabsi geliyo ama qof kale soo fara gashto ee ku dhaqmayo xaquuqda guriyeynta cadaalada ama ku caawinaya dadka kale ee ku dhaqma xaquuqda
- Sameeyo, daabaco, ama shaaciyoo qoraal kasta, ee la xiriiro iibsiga ama kirada guriga, taas oo tilmaanta xadeynta doorbidida, ama takoorka ku saleysan qowmiyada, midibka, diinta, galmada, curyaannimada, heerka qoyska, ama asalka dhalashada. Mamnuucida ka soo horjeeda xayeysiinta takoorka waxay quseysaa hal-qoys iyo milkiilaha guriga la daganyahay haddii kale laga saaray Xeerka Cadaalada Guriyeynta
- Diido in uu sheego daboolida caymiska milkiilaha guriga sababtoo ah qowmiyada, midibka, diinta, nin/naag, curyaannimada, heerka qoyska, ama asalka dhalashada milkiilaha iyo/ama dadka degan guriga
- Takoorida muddada ama sharuudaha daboolida caymiska milkiilaha guriga sababtoo ah qowmiyada, midibka, diinta, nin/naag, curyaannimada, heerka qoyska, ama asalka dhalashada milkiilaha iyo/ama dadka degan guriga

- Diido in uu sheego warbixinta la heli karo ee nooc buuxa ah ee dooqa daboolida caymiska milkiilayaasha guriga ee la heli karo sababtoo ah qowmiyada, iwm. ee milkiilaha iyo/ama dadka degan guriga
- Sameeyo, daabaco, ama shaaciyo qoraal kasta, ee la xiriiro bixinta daboolida caymiska milkiilaha guriga, ee iibsiga ama kirada guriga, taas oo tilmaanta xadeynta doorbidida, ama takoorka ku saleysan qowmiyada, midibka, diinta, galmada, curyaanimada, heerka qoyska, ama asalka dhalashada.

ILALADA DHEERAADKA HADDII AAD QABTID CURYAANNIMO

Haddii adiga ama qof adiga kula xiriiro uu:

- Qabo curyaanimada jirka ama maskaxda (oo ay ku jiraan maqalka, dhaqdhaqaaqa iyo curyaanimada aragtida, kansarka, jirada maskaxda raagta, HIV/ AIDS, ama dhinnaanta maskaxda) ee si xoogan u xadeyso hal ama in ka badan ee howlaha nolosha
- Qabo diiwaanka curyaanimada noocaas ah ama
- Laguu tixgeliyay sida qabitaanka curyaanimada, guri bixiyaha laga yaabo in uu san:
 - Diidin in aad sameysid bedelo macquul ah ee gurigaaga ama aagaga caadiga loo isticmaalo, ee qarashkaaga, haddii ay muhiim kuu noqoto ama si buuxdo aad u isticmaasho guriga. (Meesha macquulka ah, milkiilaha guriga laga yaabo in uu diido isbedelada kaliya haddii aad ogolaatid in aad ugu haysid guriga xaalada uu ahaa marka aad guureysid.)
 - Diido in aad sameysid hoy macquul ah ee sharciyada, xeerarka, dhaqamada ama adeegyada haddii laga yaabo in ay muhiim kuu tahay in aad ku isticmaashid guriyeynta qaab ku saleysan sinnaan oo aan ku jirin qofka curyaanka.

Tusaale: Dhismaha leh “xayawaanka lama ogola” xeerka waa in uu u ogolaadaa kireysta aragtida curyaan ka ah qaba si uu u haysto ey ilaalo ah.

Tusaale: Dhismaha dabaqa ee siiyo kireystaha wax ku fillan, baakin aan loo xilsaarin waa in ay sharafeysaa codsiga kireystaha dhaqdhaqaaqa curyaanka ah ee booska la diyaariyay ee u dhow dabaqeeda haddii ay noqoto muhiin si loo hubiyo in ay heli karto gelitaanka dabaqeeda.

Si kastaba, Xeerka Cadaalada Guriyeynta ma ilaaliyo qofka halista tooska ah ku ah caafimaadka iyo amniga dadka kale ama midka hadeer isticmaalay daroogo sharci daro ah.

Sharuudaha Helitaanka ee Dhismooyinka cusub ee Qoyska badan:

Dhismaha leh afar ama shan qeyb ee markii hore la dagay kadib Maarso 13, 1991, iyo wiish leh:

- Aagaga isticmaalka bulshada iyo caadiga ah waa in ay geli karaan dadka curyaanka ah
- Dhammaan daaqaadaha iyo wadooyinka hoolka waa in ay balacsanaan ku fillan gaariga curyaanka ah yihiin
- Dhammaan qeybaha waa in ay lahaadaan:
 - Wado la mari karo iyo ilaa qeybta
 - Daarista nalka oo la gaari karo, gododka korontada, qalabyada qaboojiyaha iyo xakameynta kale ee jawiga
 - Darbiyada qubeyska ee xoojisan si ay ugu ogolaato hadhow gelinta qeybo saarasho iyo
 - Jikooyinka iyo qubeyska ee loo isticmaali karo dadka curyaanka ah.

Haddii dhismo afar qeyb ama kabadan leh uu san laheyn wiish iyo waxaa kowdii la dagay kadib Maarso 13, 1991, heerarkan waxay quseeyaan qeybaha dabaqa hoose kaliya.

Sharuudahaan helitaanka ee dhismooyinka qoysaska badan ma bedelaan heerar adag ee helitaanka looga baahanyahay sharciga Gobolka ama deegaanka.

ILAAALADA GURYAHA EE QOYSASKA CARRUURTA WATA

Xeerka Cadaalada Guriyeynta wuxuu ka dhigay sharci daro in la takooro qofka qoyskiisa uu ku jiro hal ama labo ciyaal ee ka yar 18 sanno jir (heerka qoyska). Illaalada Heerka qoyska wuxuu daboolaa qoyska hal ama carruur ka badan ay la noolyihiin:

- Waalidka;
- Qofka haysto haynta sharciga ah (oo ay ku jiraan illaalinta) canuga ama carruurta yar; ama

- Waalaidka ama masuulka u xilsaaran sharci ahaan, ee wata ogolaansho qoraal ah ee waalidka ama hayaha sharciysan.

Ilaalada heerka qoyska sidoo kale wuxuu kordhiyaa haweenka uurka ah iyo qof walba ee nidaamka ku jira ee badbaadinta haynta sharciga canuga yar (oo ay ku jiraan korsiiimada ama waalidka korsaday).

“Guriyeynta Dadka Waayeelada” Marka laga reebo: Xeerka Cadaalada Guriyeynta gaar ahaan laga reebay xarumaha guriyeynta qaar ee sareeyo iyo masuuliyada bulshooyinka takoorka heerka qoyska. Marka laga reebo xarumaha guriyeynta sare ama bulshooyinka waxay si sharci ah u diidi karaan in ay ka iibiyaan ama ka kireeyaan guriga qoysaska carruurta yar leh. Si markaas aad ugu qalintid “guriyeynta dadka waayeelka” marka laga reebo, xarunta ama bulshada waa in ay cadeeyaan in guriyeynteeda lagu:

- Bixiyay sida waafaqsan barnaamijka Gobolka iyo Federaalka ee HUD ay go'aansatay in si gaar ah loo naqshadeeyo iyo looga shaqeeyo si ay u caawiso dadka waayeelka (sida lagu qeexay barnaamijka Gobolka iyo Federaalka); ama
- Loogu talagalay, iyo kaliya dagay dadka 62 sanno jirka ah ama ka weyn; ama
- Loogu talagalay iyo ka shaqeeyaan dagitaanka dadka 55 sanno jirka ama ka weyn.

Si markaas aad ugu qalintid “55 ama ka weyn” ka reebida guriyeynta, xarunta ama bulshada waa in ay ku qancaan mid walba ee sharuudaha xigga:

- ugu yaraan boqolkiiba 80 ee qeybaha waa in ay lahaadaan ugu yaraan hal qof oo 55 sanno jir ah ama ka weyn; iyo
- xarunta ama bulshada waa in ay shaaciyaan iyo u hogaansamaan xeerarka iyo nidaamkyada muujiya ujeedada lagu wadayo sida “55 ama ka weyn” guriyeynta; iyo
- xarunta ama bulshada waa in ay u hogaansamaan sharuudaha sharciyeynta HUD ee xaqiijinta da'da daganaanshaha.

“Guriyeynta dadka waayeelada ah” marka laga reebo ma ilaaliso xarumaha guriyeynta sare ama bulshooyinka masuuliyada takoorida guriyeynta ee ku saleysan qowmiyada, midibka, diinta, nin/naag, ama asalka dhalashada.

HUD waxay diyaar u tahay in ay kugu caawiso wixii dhib ah ee takoorka guriyeynta. Haddii aad u maleysay in xaquuqdaada lagu xadgudbay, waxaad ku gudbin kartaa cabasho onleenka, warqad u qori kartaa ama taleefon u diri kartaa xafiiska HUD ee kugu dhow. Waxaad haysataa hal sanno kadib marka ay dhacday xadgudubka takoorka ama dhammaaday si aad cabasho ugu gudbisoo HUD, laakin waa in aad ku gudbisaa sida ugu dhaqsiiha badan ee suurtoogalka ah.

HADDII AAD U MALEYSAY XAQUUQDAADA IN LAGU XADGUBBAY

Maxaa loo sheegayaaa HUD:

- Magacaaga iyo ciwaanka
- Magaca iyo ciwaanka qofka cabashadaada ay ka soo horjeedo (eedeysanaha)
- Ciwaanka ama aqoonsigooda guriyeynta waxaa ku jira
- Sharaxaad gaaban ee xadgudubka lagu eedeeyay (dhacdada kugu sababtay in aad aaminto in xaquuqdaada lagu xadgudbay)
- Taariiqaha xadgudubka lagu soo eedeeyay.

Meesha loo Qoro ama la Waco: Ku dir cabasho onleenka, ku dir warqad xafiiska HUD ee adiga kuu dhow, ama haddii aad jeceshahay, waxaad si toos ah usoo wici kartaa xafiiska. Dadka dhagoolka ah ama ku adagtahay maqalka iyo isticmaalo TTY, waxay soo wici karaan xafiisyadaas ee dhinaca taleefonka bilaashka ah ee Warbixinta Federaalka Adeegyada Relay ee 1-800-877-8339.

Wixii Connecticut, Maine, Massachusetts, New Hampshire, Rhode Island iyo Vermont:

XAFIIS GOBELEEDKA BOSTON

(Complaints_office_01@hud.gov)

Waaxda Guriyeynta Mareykanka iyo Hormarinta Magaalada

Thomas P. O'Neill Jr. Dhismaha Federaalka

10 Wadada Causeway, Qolka 321

Boston, MA 02222-1092

Taleefonka (617) 994-8300 ama 1-800-827-5005

Fakis (617) 565-7313 * TTY (617) 565-5453

Wixii New Jersey, New York, Puerto Rico iyo U.S. Virgin Islands:

XAFIIS GOBELEEDKA NEW YORK

(Complaints_office_02@hud.gov)

Waaxda Guriyeynta Mareykanka iyo Hormarinta Magaalada
26 Federal Plaza, Qolka 3532
New York, NY 10278-0068
Taleefonka (212) 542-7519 ama 1-800-496-4294
Fakis (212) 264-9829 * TTY (212) 264-0927

Wixii Delaware, Degmada Columbia, Maryland, Pennsylvania, Virginia iyo West Virginia:

XAFIIS GOBELEEDKA PHILADELPHIA

(Complaints_office_03@hud.gov)

Waaxda Guriyeynta Mareykanka iyo Hormarinta
Magaalada dhismaha Wanamaker
100 Penn Square East Philadelphia,
PA 19107-9344

Taleefonka (215) 861-7646 ama 1-888-799-2085
Fakis (215) 656-3449 * TTY (215) 656-3450

Wixii Alabama, Florida, Georgia, Kentucky, Mississippi, North Carolina, South Carolina, iyo Tennessee:

XAFIIS GOBELEEDKA ATLANTA

(Complaints_office_04@hud.gov)

Waaxda Guriyeynta Mareykanka iyo Hormarinta Magaalada
Five Points Plaza

40 Wadada Marietta, Dabaqa 16aad
Atlanta, GA 30303-2808

Taleefonka (404) 331-5140 ama 1-800-440-8091 x2493
Fakis (404) 331-1021 * TTY (404) 730-2654

Wixii Illinois, Indiana, Michigan, Minnesota, Ohio iyo Wisconsin:

XAFIIS GOBELEEDKA CHICAGO

(Complaints_office_05@hud.gov)

Waaxda Guriyeynta Mareykanka iyo Hormarinta
Magaalada Ralph H. Metcalfe Dhismaha Federaalka
77 West Jackson Boulevard, Qolka 2101
Chicago, IL 60604-3507

Taleefonka 1-800-765-9372
Fakis (312) 886-2837 * TTY (312) 353-7143

Wixii Arkansas, Louisiana, New Mexico, Oklahoma and Texas:

XAFIIS GOBELEEDKA FORT WORTH

(Complaints_office_06@hud.gov)

Waaxda Guriyeynta Mareykanka iyo Hormarinta Magaalada

801 Wadada Cherry

Dhinaca 2500, Qeybta #45

Fort Worth, TX 76102-6803

Taleefonka (817) 978-5900 ama 1-888-560-8913

Fakis (817) 978-5876/5851 * TTY (817) 978-5595

Wixii Iowa, Kansas, Missouri iyo Nebraska:

XAFIIS GOBELEEDKA KANSAS CITY

(Complaints_office_07@hud.gov)

Waaxda Guriyeynta Mareykanka iyo Hormarinta Magaalada

Gateway Tower II

400 State Avenue, Qolka 200, Dabaqa 4aad

Kansas City, KS 66101-2406

Taleefonka (913) 551-6958 ama 1-800-743-5323

Fakis (913) 551-6856 * TTY (913) 551-6972

Wixii Colorado, Montana, North Dakota, South Dakota, Utah iyo Wyoming:

XAFIIS GOBELEEDKA DENVER

(Complaints_office_08@hud.gov)

Waaxda Guriyeynta Mareykanka iyo Hormarinta Magaalada

1670 Broadway

Denver, CO 80202-4801

Taleefonka (303) 672-5437 ama 1-800-877-7353

Fakis (303) 672-5026 * TTY (303) 672-5248

Wixii Arizona, California, Hawaii iyo Nevada:

XAFIIS GOBELEEDKA SAN FRANCISCO

(Complaints_office_09@hud.gov)

Waaxda Guriyeynta Mareykanka iyo Hormarinta Magaalada

600 Wadada Harrison, Dabaqa Sadexaad

San Francisco, CA 94107-1387

Taleefonka 1-800-347-3739

Fax (415) 489-6558 * TTY (415) 489-6564

Wixii Alaska, Idaho, Oregon iyo Washington:

XAFIIS GOBEELEEDKA SEATTLE

(Complaints_office_10@hud.gov)

Waaxda Guriyeynta Mareykanka iyo Hormarinta
Magaalada Dhismaha Xafiiska Federaalka Seattle
909 First Avenue, Qolka 205
Seattle, WA 98104-1000
Taleefonka (206) 220-5170 ama 1-800-877-0246
Fakis (206) 220-5447 * TTY (206) 220-5185

Haddii markaad la soo xiriirtay xafiiska deegaanka adiga kuu dhow, weli aad qabtiid su'aalo – waxaad si dheeraad ah ula xiriiri kartaa HUD:

Waaxda Mareykanka ee Guriyeynta iyo Xafiiska Hormarinta
Bulshada ee Cadaalada Guriyeynta iyo Fursada Simman
451 Wadada 7aad, S.W., Qolka 5204
Washington, DC 20410-2000
Taleefonka 1-800-669-9777
Fakis (202) 708-1425 * TTY 1-800-927-9275
www.hud.gov/fairhousing

Haddii aad Curyaan tahay: HUD sidoo kale wuxuu bixiyaa:

- Taleefonka A TTY ee dhagoolada/ay ku adagtahay maqalka isticmaalayaasha (fiiri liiska kore ee xafiiska kuugu dhow ee HUD)
- Turjubaano, Cajalado iyo Qoraalka indhoolaha
- Caawinta aqrinta iyo foomamka la buuxiyay

MAXAA DHACO GOORTA AAD GUDBISO CABASHO?

HUD ayaa qoraal ahaan kugu soo ogeysiineyso marka cabashadaada la ogolaado ee buuxinta sida waafaqsan Xeerka Cadaalada Guriyeynta. HUD sidoo kale waxay:

- Ogeysiineysaa eedeysanaha xadgudubka (eedeysanaha) buuxinta cabashadaada, iyo u ogolaato jawaabaha waqti lagu gudbiyo jawaab qoraal ah ee cabashada.

- Baarayaan cabashadaada, iyo go'aaminta haddii ay jirto ama aysan jirin sabab macquul ah ee lagu aamino in eedeysanaha ku xadgudbay Xeerka Cadaalada Guriyeynta.
- Ogeysiinayaan adiga iyo eedeysanaha haddii HUD aysan ku buuxin karin baaritaankeeda 100 maalmood ee buuxinta cabashadaada, iyo sheeg sabab daahitaanka ah.

Dhexdhexaadinta Xeerka Cadaalada Guriyeynta: Inta lagu jiro baaritaanka cabashada, HUD waxaa laga rabaa in ay ku siiso iyo eedeysanaha fursada si iqtiyaar ah loogu xaliyo cabashadaada ee Heshiiska Dhexdhexaadinta.

Heshiiska Dhexdhexaadinta wuxuu siiyaa shaqsiyaadka bixiyaa gargaarka gaarka ah, iyo badbaadiyo danaha bulshada iyada oo la ogaanayo takoorka mustaqbalka ee eedeysanaha. Marba haddii adiga iyo eedeysanaha aad saxiixdaan Heshiiska Dhexdhexaadinta, iyo HUD ay ansixiso Heshiiska, HUD waxay joojineysaa baaritaanka cabashadaada. Haddii aad aaminsantahay in eedeysanaha uu ku xadgudbay jabiyay Heshiiska Dhexdhexaadinta, waa in aad si degdeg ah ku soo ogeysiisaa xafiiska HUD ee baaray cabashadaada. Haddii HUD ay go'aansato in ay jirto sabab macquul ah ee lagu aamino in eedeysanaha ku xadgudbay Heshiiska, HUD wuxuu weydiinayaa Waaxda Mareykanka ee Cadaalada in ay gudbiyaan dacwad ka soo horjeeda eedeysanaha ee Maxkamadda Degmada Federaalka si loo fulliyo muddooyinka Heshiiska.

Gudbinada Cabshooyinka ee Gobolka ama Hay'adaha Cadaalada Guriyeynta Bulshada Deegaanka: Haddii HUD ay cadeeyso in hay'adaada cadaalada guriyeynta bulshada deegaanka ama Gobolka fullisay sharciga xaquuqda rayidka ama qaynuunka sheego xaquuqda, daaweynta iyo illaalada ah "si xoogan ugu dhiganta" Xeerka Cadaalada Guriyeynta, HUD waa in ay si degdeg ah ugu gudbisaa cabashadaada hay'adaas oo baaritaan ah iyo waa in si degdeg ah lagu ogeysiiyaa gudbinta. Gobolka ama hay'ada deegaanka wuxuu baarayaa cabashadaada sida waafaqsan "si xoogan ugu dhiganta" Gobolka ama sharciga xaquuqda rayidka ama qaynuunka. Gobolka ama hay'ada cadaalada guriyeynta bulshada deegaanka waa in ay ku bilaabaan baaritaanka cabashadaada 30 maalmood gudahood ee gudbinta HUD, ama HUD laga yaabo in uu ka dajisto ("dib u furto") cabashada ee baaritaanka sida waafaqsan Xeerka Cadaalada Guriyeynta.

Maxaa Dhaca Haddii Aan Waayo Gurigeeyga ee Dhinaca Ka saarida ama libinta?

Haddii aad u baahantahay caawinta lagu joojinayo ama looga hortagayo dhibaato daran ee ay sababtay xadgudubka Xeerka Cadaalada Guriyeynta, HUD waxaa usurtogali karto in ay kugu caawiso sida ugu dhaqsaha badan ee aad ku soo gudbiso cabashada. HUD laga yaabo in ay ansixiso Waaxda Mareykanka ee Cadaalada si loo gudbiyo Codsiga ee Maxkamadda Degmada Federaalka ee Amarka Xakameyn Kumeelgaar ah (TRO) ee ka soo horjeeda ee deysanaha ee Amarka Ugu horeeya ee sugitaanka natiijada baaritaanka HUD. Garsooraha Federaalka ayaa laga yaabaa in uu bixiyo TRO ama Amarka Ugu horeeya ee ka soo horjeeda ee deysanaha ee dacwadaha meesha:

- Waxyeelada lahagaajin karin (aan gadaal loo celin karin) ama dhaawac ee xaquuqda guriyeynta waxay u dhowdahay in ay dhacdo iyada oo aan jirin faragelinta HUD; iyo
- Waxaa jiro cadeyn la taaban karo ee ah in ee deysanaha uu ku xadgudbay Xeerka Cadaalada Guriyeynta.

Tusaale: Milkiilaha wuu ogolaadaa in uu iibiyo guri, laakin, markii la ogaaday in iibsadayaasha ay yihiin madow, suuqano ka saaro guriga, kadib si degdeg ah ugu qoro iib markale. Iibsadaha wuxuu gudbiyaa cabashada takoorka iyo HUD. HUD laga yaabo in ay u ogolaato Waaxda Mareykanka ee Cadaalada in ay raadiso amarka ee Maxkamadda Federaalka Degmada si looga hortagao milkiilaha in uu ka iibiyo guriga qof kale ilaa HUD ay baarto cabashada.

MAXAA DHACO MARKII CABASHADA LA BAARO?

Go'aanka Sababta Dhalisay, Ku dalacitaanka Takoorka, iyo Doorashada: Marka baaritaanka cabashadaada la dhameystiro, HUD waxay diyaarineysaa Wargelinta ugu Dambeyso ee soo koobeysa cadeynta la isu keenay inta lagu jiray baaritaanka. Haddii HUD ay go'aansato in ay jirto sabab macquul ah ee lagu aamino in ee deysanayaasha ay ku takooreen, HUD waxay sameyneysaa Go'aaminta Sabab Macquul ah iyo ku Eedeeynta Takoorka ka soo horjeedo ee deysanayaasha. Adiga iyo ee deysanayaasha waxaad haysataan labaatan (20) maalmood kadib marka aad heshid ogeysiinta Eedeeynta si loo go'aansado haddii dacwadaada laga dhageysanayo Garsooraha Sharciga Maamulka HUD (ALJ) ama si aad u heshid Maxkamadda rayidka ee Maxkamadda Federaalka Degmada.

Dhageysiga Garsooraha Sharciiga Maamulka HUD: Haddii midkood adiga ama eedeysanaha doorataan in aad sameysataan Maxkamadda rayid Federaalka ka hor 20-maalin ee ay dhacdo Muddada Doorashada, HUD waxay si degdeg ah u balaminayaan Dhageysi dacwadaada ah ka hor HUD ALJ. Dhageysiga ALJ waxaa lagu sameynayaa deegaanka meesha takoorida ay ka dhacday. Inta lagu jiro Dhageysiga ALJ, adiga iyo eedeysanayaasha waxaad xaq u leedihiin in aad qof ahaan uga qeybgashaan, in uu ku matalo lataliye sharci, in aad cadeyn keentid, in aad baartid marqaatiyada iyo in aad codsatid amarka lagu keenayo gargaarka cadeynta la ogaaday. Qareenka HUD ayaa ku matalayaa inta lagu jiro Dhageysiga ALJ oo bilaash kugu ah; si kastaba, waxaad sidoo kale dooran kartaa in aad soo dhaxgashid dacwada iyo haysatid qareenkaaga gaarka ah. Gabagabada Dhageysiga, HUD ALJ waxay sameynayaan Go'aanka ku saleysan natiijooyinka runta iyo dhameystirka sharciyada. Haddii HUD ALJ ay gabagabeyso in eedeysanayaasha ay ku xadgudbeen Xeerka Cadaalada Guriyeynta, eedeysanayaasha waxaa lagu amri karaa in ay:

- Kuu magdhabaan waxyeelada dhabta ah, oo ay ku jiraan qarashyada jeebka ka baxay iyo waxyeelada saxariirka dareenka
- Bixiyaan gargaarka amar joogta ah.
- Bixiyaan gargaar ku haboon sinnaanta (tusaale, in guriga adiga lagu diyaariyo).
- Ku siiyaan qidmada macquulka ah ee qareenka.
- Ku siiyaan qasaaraha rayidka ee HUD si loo gargooyo danaha bulshada. Ugu badnaan qasaaraha rayidka waa: \$16,000, ee xadguudbka koowaad ee Xeerka; \$37,500 haddii xadgudub hore ay ku dhacday ee horeynta muddo shan sanno ah; iyo \$65,000 haddii labo ama ka badan xadgudub horeyay uu dhacay muddo todobo sanno.

Maxkamadda Rayidka ee Maxkamadda Federaalka Degmada: Haddii midkood adiga ama eedeysanaha uu doorto in uu helo Maxkamadda Federaalka rayidka ee cabashadaada, HUD waa in ay u gudbisaa dacwadaada Waaxda Mareykanka ee Cadaalada oo fullin ah. Waaxda Mareykanka ee Cadaalada waxay gudbineysaa dacwad rayid ah oo matalaadaada ah Maxkamadda Degmada Mareykanka ee degmada takoorida ay ka dhacday. Waxaad sidoo kale dooran kartaa in aad soo faragelisid dacwada iyo haysatid qareenkaaga gaarka ah. Midkood adiga ama eedeysanaha waxaad codsan kartaan xukunka xeer beegida, iyo idinka midkiin waxaad xaq u leedihiin in aad qof ahaan uga qeybgashaan,

in uu ku matalo lataliye sharci, in aad cadeyn keentid, in aad baartid marqaatiyada iyo in aad codsatid amarka lagu keenayo gargaarka cadeynta la ogaaday. Haddii Maxkamadda Federaalka go'aansato rabitaankaaga, garsoore ama guddiga xeer beegida ayaa ku amrayo eedeysanayaasha in ay:

- Kuu magdhabaan waxyeelada dhabta ah, oo ay ku jiraan qarashyada jeebka ka baxay iyo waxyeelada saxariirka dareenka
- Bixiyaan gargaarka amar joogta ah.
- Bixiyaan gargaar ku haboon sinnaanta (tusaale, in guriga adiga lagu diyaariyo).
- Ku siiyaan qidmada macquulka ah ee qareenka.
- Ku siiyaan ciqaabta waxyeelada adiga.

Go'aaminta Sabab aan Macquul Aheyn iyo Beeninta: Haddii HUD ogaato in ay san jirin sabab macquul ah ee lagu aamino in eedeysanaha ku xadgudbay Xeerka, HUD waxay beenineysaa cabashadaada iyo Go'aaminta Ma jirto Sabab Macquul ah. HUD waxay ku soo ogeysiineysaa adiga iyo eedeysanaha beeninta boosta ahaan, iyo waxaad codsan kartaa koobi ah Wargelinta Baaritaanka Ugu dambeysay.

Dib u tixgelinta Go'aamada aan sababta Macquulka ah laheyn: Xeerka Cadaalada Guriyeynta ma bixiso nidaam hore oo rasmi ah ee cabashada ay beenisay HUD. Sikastaba, haddii cabashadaada la beeniyo iyo Go'aaminta Ma jiro sabab Macquul ah, waxaad gudbin kartaa codsi qoraal ah ee dib u eegida dib u tixgelinta: Agaasimaha, Xafiiska FHEO ee Fullinta, Waaxda Mareykanka ee Guriyeynta iyo Hormarinta Bulshada, 451 Wadada 7aad, SW, Qolka 5206, Washington, DC 20410-2000.

INTAA WAXAA DHEER

Waxaad Gudbin Kartaa Dacwad Gaar ah: Waxaad gudbin kartaa dacwada rayidka oo gaar ah adiga oo aan u gudbin cabasho HUD. Waxaad ku gudbin kartaa dacwad labo (2) sanno gudahood ee xogta hadeer ah ee ficilka xadgudubka takoorka.

Haddii aad u gudbisid cabasho HUD iyo xitaa haddii HUD ay beeniso cabashadaada, Xeerka Cadaalada Guriyeynta waxay ku siinayaan xaquuqda lagu gudbinayo dacwada xaquuqda gaarka ah ee ka soo horjeedo eedeysanayaasha ee Maxkamadda Federaalka Degamada. Waqtiga inta lagu jiro ee HUD ay sii wado cabashadaada laguma xisaabinayo 2-da sanno ee muddada

gudbinta. Waa in aad ku soo gudbisaa dacwadaada qarashkaaga gaarka ah; sikastaba, haddii aadan awoodin qareenka, Maxkamadda ayaa mid kuu magacaabeyso.

Xitaa haddii HUD ay weli wado cabashadaada, waxaad gudbin kartaa dacwada rayidka gaarka ah ee ka soo horjeedo ee deysanaha, ilaa (1) mar hore aad saxiixday Heshiiska Dhexdhexaadinta HUD si loo xaliyo cabashadaada HUD; ama (2) Garsooraha Sharciga Maamulka HUD ayaa bilaabay Dhageysiga Maamulka ee cabashadaada.

Qalabyada Kale ee Lagu Dagaalamo Takoorka Guriyenta:

- Haddii aan loo hogaansamin amarka Garsooraha Sharciga Maamulka, HUD waxaa laga yaabaa in ay raadiso gargaar kumeelgaar ah, fullinta amarka ama xakameynta amarka ee Maxkamadda Racfaanka Mareykanka.
- Xeer ilaaliyaha Guud wuxuu u gudbin karaa dacwad Maxkamadda Federaalka Degmada haddii ay jirto sabab macquul ee lagu aamino hannaanka ama dhaqanka takoorka guriyenta ee dhaceyso.



Xusuus

CADAALADA GIIRIYEYNTA Fursad Simman oo Dadkoo dhan ah



Xusuus

CADAALADA GURIYEYNTA Fursad Simman oo Dadkoo dhan ah



Xusuus

CADAALADA GIIRIYEYNTA Fursad Simman oo Dadkoo dhan ah



Xusuus

CADAALADA GURIYEYNTA Fursad Simman oo Dadkoo dhan ah

Wixii warbixin dheeraad ah


Ujeedada warqadaan waa soo koobida xaquuqdaada iyo cadaalada guriyeynta. Xeerka Cadaalada Guriyeynta iyo sharciyada HUD wuxuu wataa sharaxaad badan iyo warbixin farsamo ah. Haddii aad u baahantahay koobiga sharciga iyo xeerarka, la xiriir Xafiiska Cadaalada Guriyeynta HUD ee kuu dhow. Fiiri liiska Xafiisyada Cadaalada Guriyeynta HUD boggaga 7-10.



KU XIRAN HUD



Department of Housing and Urban Development
Room 5204
Washington, DC 20410-2000



02305

HUD-1686-1-FHEO
2011

Fadlan booqo websaydkeena: www.hud.gov/fairhousing

